# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 9:51 AM** **Hansard No.23/03** **Kal-fadhiga 23aad**

**Fadhigii 12aad** **Taariikhda *11/01/2014***

## Warbxinta Wasiirka Wasaarada Duulista iyo Hawada ee Mashruuc Sharciga Xeerka Duulista Madaniga ah.

**Gudoomiyaha:- C/raxmaan Maxamed Claahi ( Cirro):-** waxaa la iclaamiyay inuu Golaha hor imanayo Wasiirka Duulista iyo Hawada Md. Maxamuud Xaashi Cabdi si uu uga warbixiyo Xeerka Duulista Madaniga ah oo Golaha Xukuumadu u soo gubiyay intaana gudagaley Warbixinta Wasiirka waxaan Golaha u akhrinayaa Degreetada Xeerkan ee Madaxweynaha ku soo gudbiyay oo Golaha Wasiiradu ansixiyay 26/09/2013 ee Mashruuc Sharci ee Xeerka Duulista Madaniga ah, waxaan ka codsanayaa Xogheynta in Mudanayaasha loo qeybiyo Nuqulka Xeerka, hadii la dhameystiray qeybintii Xeerka waxaynu haysanaa laba option oo ah inuu Wasiirku inoo akhriyo Warbixinta Xeerka, ka dibna Mudanayashu soo akhriyay oo Markale wixii su'aalaha ka weydiiyaan oo xeerka Gudidda u gudbino iyo su'alaha maantaba weydiino, Markaa iminka waxaan ku soo dhoweynayaa Wasiirka mudane wasiir ku soo dhow.

**Md. Maxamud Xaashi Cabdi Wasiirka Duulista iyo Hawada:-** Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal marka hore Salaanta islaamkaan idinku salaamayaa, salaam ka dib sharaf weyn bay ii tahay inaan aqalka Golaha Wakiilada hor imaado si aan Mudanayaasha ugu sharxo Nuxurka uu xambaarsanyahay Xeerkan saaka loo qeybiyay oo Qaranka ugu fadhiya dan aad u balaadhan, Xeerkan Xukuumada Somaliland waxay dooneysaa in lagu asaaso Golahanina uu nala qaato oo nagu garabgalo hay'ad Masuul ka ah Maamulka Hawada Somaliland, Hay'addani waa mid dunida oo dhan ay leedahay gaar ahaan noloshan casriga ah ilaa markii degaalkii labaad ee dunida laga soo doogey dunidu waxay isla qaadatey in la abuuro hay'ad noocan oo kale ah oo maamusha hawadiisa.

Somaliland waxay ka mid tahay inkastoo ayna helin Aqoonsi caalami ah hadana waa qaran madax banaan oo u hogaansan qawaaniinta Caalamiga ah sida **Qodobka 10aad** Dastuurka JSL uu dhigayo, Markaa inagoo ka duuleyna danaha iyo Masuuliyada uu inoo xambaarsanyahay ee Hay'addani ay meel

marin doonto, hay'adda Duulista Somaliland oo afka qalaadna lagu yidhaahdo (**Somaliland Civil Aviation authority),** dunidu siyaabo badan bay u sameysataa hay'addani qaarkood hay'ad madax banaan baa laga dhigaa oo board awood badan lihi uu maamulo iyo qaarkoodna waxaa laga dhigaa (sami-independent) Madaxbanaani xadeysan ayay leeyihiin gaar ahaan wadamada afrika ee aynu la midka nahay iyo kuwa carabtu civil aviation koodu waxay dhisan yihiin qaabkan aynu inagu rabno inaynu u dhisano.

Waxaa jira marka hay'adda la asaasayo madaama la waafaqayo (**Chicago Convention)** heshiiyada caalamiga ah ee dunida ku waajibinaya inay sameystaan hay'ad maamusha hawadooda waxay leeyihiin tiirar (pillars) aan la taaban Karin oo hay'adda u xilsaaran hawada caalamka ee ICAO ay qiimeynayso.

Markaa Xeerkan oo ka kooban 17 qeybood iyo 91 Qodob, waa xeer balaadhan wuxuu asaasayaa Hay'addaa Micnaha weynd dalka ugu fadhida ee Maamuleysa Hawadiisa, shaqadaa iminka waxaa haysa Wasaarada aan Masuulka ka ahey ee Duulista iyo Hawada, Wasaaradin waxay iminka haysa, mar waa (policy maker) oo siyaasadey sameysaa ee airportska iyo hawadeena, marna (regaled) oo sida Civil aviation ka ayaan u shaqeynaa oo anagaa meel marin, marna waa operation oo madaarada laftooda gacantaanu ku haynaa, Markaa saddexdaa shaqo ayay Wasaaradu haysaa.

Wadamada qaarkood waxay leeyihiin airport authorities oo Garoomadu way madax banaan yihiin oo waxaa maamula maamulo gaara ama shirkado madaxbanaan, hay'addaha duulista hawaduna waa regulated body oo waxaasey meel mariyaan oo operationkaas ayay kormeeraan isla markaana hubiyaan habsami u socodkooda, wasaaraduhuna waa policy maker oo kaliya.

Marka qaabka Wasaarada loo kala saarayaa waxa weeye Xeerkani wuxuu asaasayaa Hay'adaa, wuxuu kala saarayaa shaqadii ay wasaaradu haysay oo qeybna wuxuu ku reebi doonaa Wasaarada oo ah Masuuliyada qeybna Hay'adda oo shaqadeeda u madax banaan Wasaaradana hoos imaneysa policy ahaan, waa nidaamka ay ku dhaqmaan dawladan dariskeenu oo dhami oo waa systemka u abuuran yihiin, inaguna sideynu doono uma sameysan karno Civil Aviation ka, wadan waliba siduu doono uma dhisto oo waxaa jira qawaaniin caalamiya oo aan laga gudbi Karin sida ICAO Pillars, Markaa tiirarkaa waa la eegayaa.

Xeerkeenan waxaa qiimeyneysa Hay'adda ICAO, waxaa qiimeyneysa wadama hawadeena ka ganacsada, shirkada madaxbanaan, wadamada aynu macaamileyno Civil aviation kooda, oo dhamaantood waxay inagu

qiimeynayaan Xeerka aynu leenahay iyo sida uu shaqeeyo iyo inaynu Hay'addan leenahay, ilaa Xeerka la ansixiyo umaanu arkeyn Xukuumada ahaan inaanu iska sameyn karno ama Wareegto Madaxweyne ay ku filantahay ama hay'ad Xeer Sharciyi jideyn inaanu meel marino.

Hay'addani waxay inoo keeni doontaa sumcad faro-badan oo ay qarankan u soo hoyneysaa, inagoo Qaran Madax banaan aheyn ayay ku khasban tahay hay'adda duulimaadyada Caalamku ee ICAO inay aqbasho oo la macaamisho Civil Aviation keena, laakiin lama macaamilikaraan Wasaarad xil siyaasiya haysa, wayse ku khasban yihiin intuba inay la macaamilaan Civil Aviation Authoritygeena oo la shaqeeyaan inagoo aan ka mid aheyn qaramada la aqoonsadey.

Xeerkani wuxuu suuragalinayaa in madaarada Somaliland (Security) Amnigoodu uu sii kordho, la qiimeeyo oo Goldoloolooyinkooda si fiican loo eego, wuxuu inoo horseedayaa xuquuq badan oo inaga maqan oo keeni karta inay madaaradeenu horumaraan (Development), waxaa ka mida dhaqaalaha manta laga qaado hawada qarankii burburey ee Somaliya la odhan jirey hawadiisa ee Qaramada Midoobey ay Gacanta ku hayso, waxay noqon doontaa in ay role ku yeelato oo madaaradeena lagu horumariyo si ay u hiigsadaan kuwa dhigooda ah ee caalamka oo la jaanqaadaan, Magac iyo Muunad wanaagsan bay inoo keenaysaa, Markaa nuxurkaas ayuu Xeerkan meel marinayaa.

Mudanayaal iyo Marwooyin, Waxaan idinka Codsanayaa inaad Xeerkan Waajibkiisa ka Gudataan, inaad Meel marisaan oo u egtaan danta uu xambaarsan yahay oo ah laba qeybood oo Xeerku isug jiro oo kala ah isago Sugaya Tiirarka Asaasiga ee ay tahay lagama maarmaan tahay inay aqbasho Dunidu, qeybta kalena wadam walba isagaa u madax banaan siduu u dhigayo, laakiin waxaan jira Qaab iyo Meelo ay sharci tahay inaad sidaa u dhigtaa.

Mudanayaal Xeerkan waxaa diyaariyay Khubaro uu ka mid yahay Khabiirkan ila socda, wuxuu ahaa ragii diyaariyay Xeerkan, waxaa inaga caawiyay oo kireeyay kharashkii ku baxay Dawlada Ingriiska oo aan ugu mahadnaqayo gaar ahaan Wasaarada Khaarajiga qeybta FCO, ilaa laba khabiir oo ninkani ka mid yahay ayaa xeerkan ka soo shaqeeyay, markii dambe Garyaqaanka Qaranka ayaa isna kala shaqeeyay iyo looyaro kale oo reer Somaliland oo iyaguna saxayay inuu waafaqo Xeerarka Dalka ka jira ee Golayaasha Dalku ansixiyeen.

Markaa waa Xeer qaatey mudo sanad aan ka yareyn oo laga soo shaqeeyay, tacab faro-badan lagaliyay, wuu naga dib dhacey waxaanu rabnay in sanadkii

hore Golayaasha oo dhan ka soo gudbo oo sanadkan cusub uu dhaqan galo, oo hay'adan la asaaso, horena Golahan halkan waanu ku wargaliney inaanu ku talo-jirno in hay'addaa la asaaso.

Waxaan ku soo ururinayaa, Mudane Gudoomiye waxaan Golaha Sharafta leh ka codsanayaa inay Xeerkan Dersaan oo ay Wajibkooda Dastuuriga ah ka gutaan oo ansixiyaan si aynu helno, unga gaadhno faa'idadda uu Qarankan u horseedayo, aad iyo aad baad u mahadsantihiin.

**Gudoomiyaha:-** Xeerkan waxaan ku wareejinayaa Gudidda Dhaqaalaha, waxaana laga codsanayaa inay 14 maalmood ku soo dhameeyaan Golahana ku soo celiyaan, Goluhuna wuxuu isku raacey in Wasiirka la fasaxo Mudanayaashuna Xeerka soo akhriyaan Wasiirkana balan kale u sameyno, Waxaana idinku wargalinayaa in Fadhiga Barito ee 12/01/2013 ay Gudidda Arrimaha Bulshada Golaha horkeeni doonto Xeerka Hay'adda HIV?AIDska, Fadhiguna sidaasuu inoogu xidhan yahay, Waadmahadsantihiin.

***Adjourned at 11:13 AM by the speaker of the house***

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ------------------------------------------------ | ----------------------------------------- |